



U.S. Department of Justice Community Relations Service
(Adeegga Xariirka Bulshada ee Waaxda Cadaalada Maraykanka)

Xalinka Rabshada iyo Abuurista Xalal ayadoo la adeegsanaayo Wada hadal ku aadan Isirka

Barnaamijka Wada Hadalka Ku aadan Isirka ee U.S. Department of Justice Community Relations Service's (CRS) waa hanaan isdhexgal, oo la fududeeyay kaasoo furaaya wadooyinka wada hadalka kobcinaayana isfahanka wadajirka ah si xal loogu helo iskudhacyada ku salaysan isirka loona yareeyo rabshada isirka.

Barnaamijka Wada Hadalka ku aadan Isirka wuxuu kulmiyaa ka qaybgelyaal ka kala socda qaybo badan oo kamid ah bulshada ilaa inta suuragalka ah si ay isku dhaafsadaan xogta si fool ka fool ah ama qaab oonleen ah, ay u wadaagaan sheekooyin gaar ah iyo khibrado, si daacad ah iskugu sheegaan fikradahooda, u cadeeyaan fikradah ay qabaan, ayna u abuuraan xal wax looga qabanaayo walaacyada bulshada. Wada hadalka ayaa adkaynaaya isdhagaysiga si loo adkeeyo fahanka looguna booriyo ka qaybgaleyaasha inay taxliiliyaan ayna dib u eegis ku sameeyaan fikradaha ay qabaan. Ayadoo la adeegsanaayo hanaankaan, kaqaybgaleyaasha ayaa baranaaya inay ka wada shaqeeyaan kor u qaadista xariirada isirka iyo sinaanta isirka ee bulshadooda.

Guudmarka Barnaamijka ▼



Kulanka wada hadal kasta oo la dhex-dhexaadinaayo wuxuu ku hagayaa shaqsiyaadka hanaan laga bilaabo wadaagista khibradaha gaarka ah, ilaa helitaanka fahan qoto dheer oo ku aadan khibradahaas, iyo in muhiimada la wada siiyo talaabo wadajir ah. Barnaamijka Dialogue on Race (Wada Hadal ku saabsan Isirka) ayaa leh afar talaabo.

Talaabada 1 ▼

Talaabada koobaad waxay dejinaysaa luuqda waxayna baaraan degaysaa su'aasha ah "Yaan nahay?" ayadoo la adeegsanaayo wadaagista sheekooyin gaar ah.

Talaabada 3 ▼

Inta lagu jiro talaabada sadexaad, ka qaybgaleyaasha ayaa abuuraaya higsiga bulshada, si ay uga jawaabaan su'aaha ah "Xagee ayaan higsanaynaa inaan gaarno?"

Talaabada 2 ▼

Talaabada labaad ayaa ka caawinaysa ka qaybgaleyaasha inay fahmaan "Xagee ayaan joognaa?" ayagoo adeegsanaaya fahanka qotada dheer ee taariikhda gaarka ah iyo tan wadaaga ah ee isirka bulshada.

Talaabada 4 ▼

Ugu danbayntii, talaabada afraad, ka qaybgaleyaasha ayaa ka jawaabaaya su'aasha "Maxaan samayn doonaa ka shaqsiyaad ahaan iyo anagoo kaashanayna dadka kale si aan isbadel u samayno?"

▼ Waa maxay

sababta bulshooyinku ay u tixgelinayaan barnaamijka Dialogue on Race si loo xaliyo isku dhaca qoomiyadaha loona yareeyo qalalaasaha?

Hanaanka wada hadalka ayaa kor u qaadi kara isfahanka kuna dhiiri gelin kara bulshooyinka inay ka shaqeeyaan isbadello lagu xalinaayo iskudhaca qoomiyadaha laguna yaraynaayo xiisadaha bulshada.

Yoolalka Barnaamijka

Badelida fikradaha iyo xoojinta isbadelka.

Wada hadalka ayaa ka qoto dheer xog is dhaafsiga ka qaybgaleyaasha wuxuuna fure u noqon karaa isbadal.

Midaynta bulshooyinka kala qaybsan ayadoo la adeegsanaayo wadaagista nidaamsan, casriga ah, oo faahfaahsan ee taariikhda qoomiyadaha iyo saamaynada ay ku leedahay bulshooyinka kaladuwan.

Abuurista xal.

Wada hadalku wuxuu fududeeyaa xalka iyo talaabo wada shaqayneed.

Gaarista meelo ka fog xadadka caadiga ah.

Wada hadallada waxaa ka qaybgalaaya bulshada oo dhan, wuxuuna bixinayaa iskaashiyo cusub, oo lama filaan ah.

Xog ku saabsan CRS ▼

Wuxuu adeegu ku dhisan yahay Title X ee Sharciga Xaquuqda Aadanaha oo soo baxay 1964 iyo Sharciga Kahortaga Danbiyada Nacaybka Ku salaysan ee Matthew Shepard iyo James Byrd, Jr., oo soo baxay 2009, CRS ayaa ah adeegga "nabad ilaalinta Ameerika" ee bulshooyinka waajahaaya qalalaasaha ama isku dhacyada ku salaysan kala duwanaanshaha isirka, midabka, asalka, jinsiga, aqoonsiga jinsiga, dookha galmada, diinta, iyo naafada. Adeegyada CRS ayaa diirada saaraaya kor u qaadista awooda bulshooyinka deegaanku u leeyihiin inay si madax banaan oo wada jir ah uga hortagaan xalna uga gaaraan dagaallada mustaqbalka ayagoo adeegsanaaya xalinta dhibaata, aqoon dheeraad ah, iyo wada hadal wanaagsan.

Adeegyada iyo Barnaamijyada CRS ▼

CRS wuxuu barnaamijyo taxaneaya ah siiyaa bulshooyinka waajahaaya rabshadaha kuwaasoo adeegsanaaya fahanka, kor u qaadista wada shaqaynta, iyo kahortaga iskudhacyada mustaqbalka imaan kara. Shaqaalaha CRS waa dhex-dhexaadiyaal, fududeeyaal, tababaryaal, iyo la taliyaal xirfad leh kuwaasoo khibrad u leh isku keenista xubnaha bulshada si kor loogu qaado awoodooda xal u helida rabshadaha jira iyo kahortaga rabshadaha dhici kara mustaqbalka.

Meesha aan ka Shaqayno ▼

Xarunta dhexe ee CRS 📍

Washington, DC

Saraakiisha Gobalka ee CRS 🧑

New England

Boston, MA

Waqooyi-bari

New York, NY

Atlantiga-Dhexe

Philadelphia, PA

Konfur-bari

Atlanta, GA

Galbeedka-dhexe

Chicago, IL

Konfur-galbeed

Dallas, TX

Dhexda

Kansas City, MO

Buuraleyda

Denver, CO

Galbeedka

Los Angeles, CA

Waqooyi-galbeed

Seattle, WA


Xafiiska CRS ee Goobaha Shaqada 📍

Miami, FL

Detroit, MI

Houston, TX

San Francisco, CA



Hel adeegeena, nagu xirnoow ▼

www.justice.gov/crs



facebook.com/DOJCRS/



[@DOJ_CRIS](https://twitter.com/DOJ_CRIS)



askcrs@usdoj.gov



202.305.2935

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijkaan ama adeegyada kale ee CRS, fadlan la xariir xafiiska CRS ee deegaankaaga:

<https://www.justice.gov/crs/about-crs/regional-and-field-offices>